TIPS FOR PARENTS

Starting School



Billaabidda Dugsiga-Talooyin

Billaabidda dugsiga waa waqti farax galiya ardada iyo waalidkooda. Laakiin ardada qaar ayaa ka yara dida ama ka cabsooda aadista dugsiga. Haddaba, warbixintan soo socoto ayaa ah mid caawin karta ardadaas iyo waalidkooda, billaabidda dugsigana uga dhigi karta mid sahlan.

Muxuu ilmaheygu ku baran barnaamijka xannaanada carruurta ee fasalka hore iyo midka sareba ka kooban? (Junior and Senior kindergarten)

- Barnaamijka Xannaanada carruurta (Kindergarten) waa mid hor u dhac u ah wax barashada aas aasiga ah ee ka billaabata fasalka koobaad. In kasta oo ay u ekaan karto in ilmuhu marka uu ku jiro barnaamijkan xannaanada in uu iska ciyaarayom, haddana ilmuhu waxay baranayaan xuruufta, lambarada, akhriska, farshaxanka, jir dhiska iyo sayniska iyagoo ku barto hawlo loo diro oo kala duwan.
- Macallimiintu waxay diyaariyaan alaabta ay ilmaha ku ciyaaraaan, ciyaar ilmeed kala duwan iyagoo ku diyaariyo "rugo howleed" ku dhex yaal fasalka gudihiisa, rugahaas oo ay ilmuhu marba mid tagaan.
- Barnaamijka xannaanadu waa mid ay wasaaradda waxbarashada ee gobalkan. Ontaariyo dejiso waxaa uuna ka kooban yahay: Korriinka shaqsi iyo bulsho ee carruurta, luuqadda, xisaab, sayinis iyo tiknooloji, caafimaadka iyo jir dhiska iyo farshaxanka.
- Ardada ku jirta barnaamijkan ma la siiyo shaqo guri hase yeeshee waxay inta badan keenaan buug ay la wadaagi karaan waalidkood. Adigoo ilmahaaga ku akhriya ama la akhriya buug luuqadda uu doonaba ha ahaadee waa waxa ugu wanaagsan ee ilmhaaaga ku caawin karo in ay dugsiga guul ka gaaraan.

Maxay ku kala duwan yihiin fasalka koobaad iyo barnaamijka xannaanada?

- Ardada ku jirta fsalka koobaad maalintii oo dhan ayey dugsiga jiraan waxa loo dhiga iyo waxa ay bartaanba waa waxbarasha toos ah. Carruurtu weli ciyaarta waa ay wadaan oo weli waxay bartaan bulshonimada, laakiin waxaa wax lagu baraa si toos ah iyadoo xoogga la saarayo akhriska, qorista, xisaabta, sayniska, cilmiga bulshada iyo farshaxanka.
- Marka ay ilmuhu dhammeystaan fasalka koobaad, waxaa laga rabaa in ay awood u leeyihiin in ay akhrin karaan erayada fudud, buugta fudud ee yar yar iyo in ay fahmi karaan xisaabta aas aasiga ah ee is ku dar iyo kala jar iyo wax cabbirstaba.
- Ardada qaarkeed isbeddelkan aha u gudubka fasalka koobaad wuxuu ugu adag yahay sidii uu ugu adkkaa markii ay soo galayeen barnaamijka xannaanada ee ay dugsiga billaabayeen. Waxaa laga yaabaa in ay ku qaadato dhowr asbuuc sidii ay ula qabsan lahaayeen qaabkan cusub ee wax loo barayo iyo xeerarkan cusub ee fasalka koobaad.

Sidee ayaan u caawin karaa ilmaheyga si uu ula qabsado dugsiga?

- Carruurta qaar ayaa iska ooya maalinta ugu horreysa ee dugsiga la geeyo. Laakiin inta badan way iska soo degaan wax yar uun ka dib marka uu waalidku ka tago. Macallinka ayaa kuu soo tabin doono haddii ilmahaagu uu weli dhib ka haysto la qabsashada dugsiga ama fasalka. Adiga iyo macallinka ayaa ka wada shaqeyn kara si loo caawiyo ilmahaaga.
- Marka waalidku muujiyo xiisaha uu qabo dugsiga ilmihiisa, ardaduna markaas waxaa suurta gal ah in ay taasi u soo jiiddo in ay guul ka gaaraan dugsiga. Kala hadal ilmahaaga wixii ay kala soo kulmeen dugsiga maalin walba adigoo markaas ay farxadi kugu jirto. Waxaad ilmahaaga weydiisaa su'aalo gaar ah oo ku saabsan wixii ay maalintaas la soo kulmeen sida "hees noocee ah ayaad heesteen maanta? Bug noocee ah ayuu macallinku akhriyey maanta? Ama ma booqateen maktabadda maanta?
- K a qayb qaado howlaha dugsiga in alla inta aad awooddid ama kuu suurta gal ah. K qayb galkaaga ruwaayadda dugsiga, ciyaaraha iyo xafladaha dugsiga waxay kuu sahlayaan in aad la qabsatid dugsiga waxayna ku siin fursad aad ku baratid xubnaha kale ee bulshada dugsiga.

Waqti ma galin karaa in aan dhex fariisto fasalka ilmaheyga?

- Waxaa muhiim ah in aad oggolaasho weydiisato macallinka ilmahaaga in aad soo booqan kartid fasalka. Macallimiinta badankoodu way soo dhaweeyaan waalidka, hase yeeshee waxay weydiin karaan waalidku in uu soo booqdo waqtiyo xaddidan si booqashadu aysan hakad u gelin howlaha barasho ee fasalka ka socda.

Sideen ku ogaan karaa sida uu ilmaheygu ku yahay dugsiga?

- Macallimiintu siyaabo kala duwan ayey warbixinta

people for Education
BECAUSE EDUCATION MATTERS MOST

Copies are available in several languages at *www.peopleforeducation.com.*
For more information, call 416-534-0100 or email: *info@peopleforeducation.com*
© People for Education 2009
The Ontario Trillium Foundation
La Fondation Trillium de l'Ontario
toronto community foundation

Starting School

ilmahaagu kuu soo gaarsiin karaan. Waxaa laga yaabaa in ay kaala hadlaan heerka uu marayo ilmhaaaga ama ay warqad kuu soo diraan.
- Ilmaha waxaa la soo siiyaa " warbinxinta ardeyga" report card" ugu yaraan laba jeer sanadkii. Warbixintaas oo xambaarsan horumarka uu ilmuhu ka gaarey dhammaan maaddooyinka iyo iyadoo ay jirto kulan loo qabto macallinka iyo waalidka ugu yaraan hal mar sanadkii (parent teacher interview). Haddii aadan afka Ingiriiska ku hadlin waxaad dalban kartaa in laguu keeno qof kuu turjumo.

Ka waran haddii aan doonayo in aan la hadlo macallinka?

- Haddii aad su'aalo ama wel wel qabto waxaad macallinka weydiisan kartaa in uu ballan kuu dhigo amaba dugsiga ayaa la soo wacaa oo ballanta laga dhigtaa. Marka aad ballan dhiganeyso waxaad hubineysaa in macallinku waqti ku filan oo uu kula hadli karo kuu helo iyo in uu isu diyaariyo kulanka. Ballan dhigashadaas waxay kuu sahleysaa in kulanku noqdo mid wax galmo u leh adiga, ilmahaaga iyo macallinkaba.

Waqtigeyga ma ugu deeqi karaa fasalka?

- Macallinka weydii in ay jirto fursado aad waqtigaaga ugu deeqi karto fasalka. Inta badan macallimiinta wey jecel yihiin caawinta, laakiin waxay u baahan yihiin in ay jadwalka kugu daraan si ay isugu duwaan caawinta iyo howlaha fasalka loo qorsheeyey.
- Haddii aadan maalintii haleeli karin in aad caawiso, waxaad raadisaa in ay jiraan wax aad guriga ka soo qaban kartid ama haddii ay jiraan howlo fiidkii ah amaba sabtida ama axadda. Dugsiyo badan waxay qabtaan xaflado sida habeenka filimada, carqooyin, iyo xaflado bulshada loo qabto kuwaas oo dhammaan u baahan wax caawiya.

Muxuu yahay fiidka Manhajka, maxaanse u aadayaaba?

- Fiidka manhajka waa barnaamij la qabto aalaaba bisha Sebtembaar oo loo qabto waalidka si ay ula kulmaan macallimiinta uan bartaan barnaamijyada ka baxa dugsiga. Mararka qaar barnaamijkan waxaa loogu yeeraa Bandhigga dugsiga "open House" ama fiidka la kulanka macallinka "meet the teacher night."
- Fiidka Manhajka waxaad la kumi macallimiinta waxaadna ogaan jadwalka xisadaha, waxa la iska doonayo marka ay noqoto shaqo guri iyo qorshaha sanadka. Waxaad kale oo aad fursad u heli in aad la kulanto waalidka kale iyo shaqaalaha kale ee dugsiga.

Goorma ayuu ilmaheygu baran afka Faransiiska?

- Qaar ka mid ah guddoonka waxbarashada, ardadu waxay Faransiiska ku billaabaan fasalka koobaad, qaar kalena fasalka afaraad.
- Barnaamijka barashada afka Faransiiska ama "French immersion" waa barnaamij ay ardadu bartaan afka faransiiska maalinta dugsiga inteeda badan. Barnaamijkan waxaa laga billaabaa fasalka xannaanada carruurta ee sare ama fasalka afaraad. Ka wareyso maamulaha dugsiga wixii faah faahin ah ee ku saabsan barnaamijkan.

Waa maxay guddiga dugsigu?

- Guddiga dugsigu waa ururka ka jira dugsiga oo u jira waalidka iyo bulshada dugsiga uu u adeego. La xiriir guddiga dugsiga haddii aad su'aalo ka qabtid sidii aad ugu biiri laheyd ka qayb galka howlaha wax barista ee dugsiga ama aad dooneyso aqoon la xariirta waalidka.
- Kulamada guddigan waxay u furan yihiin ruux kasta oo bulshada dugsiga ka mid ah sidaas darteed uma baahnid in aad xubin tahay si aad kulan u tagto. Ka qayb galka kulamadan waa hab sare oo aad kula socon karto waxa dugsiga ka socda.

Haddii aan caawimaad u baahdo xaggee u doonanaa?

- Way kuu furan tahay in aad caawimaad ama war bixinno dalbato mar kasta oo aad u baahato. Sekratariyayaasha dugsiyadu waxay og yihiin inta badan wax kasta oo dugsiga ka socda. Sidaa darteed xafiiska dugsiga waa meesha ugu wacan ee war iyo caawima doonka laga billaabo. Waxaad ka heli kartaa wixii ku saabsan cid kuu turjunto, wax barasahada gaarka ah , dugsiga hiwaayada, qadada dugsiga ama ballan ka dhigo maamulaha dugsiga ama macallinka ilmahaaaga.
- Dugsiyada qaar ayaa leh shaqaalaha dejinta dadka dalka ku cusub iyo inta badan dugsiyada oo leh khubaro ku caawin kara haddii ilmahaagu dhibaato ka haysato waxbarashada.
- Rugaha bulshada ee xaafaddaada, maktabadaha, iyo rugaha dhallaanka ee Ontaariyo (Ontario Early Years Centres) ayaa iyana ah meelo aad ka heli karto culuun iyo barnaamijyo iyo tas-hiilaad kale oo loogu tala galey waalidka iyo carruurta.
- Shaashada ama websaytka "the people for Education" waxay leedahay culuun ku turjuman afafkan: Arabic, Chinese, English, Farsi, French, Korean, Punjabi, Russian, Somali, Spanish, Tamil and Urdu at *www.peopleforeducation.com*

people for Education
BECAUSE EDUCATION MATTERS MOST

People for Education is an independent parents' group working to support public education in Ontario's English, French and Catholic schools.

You can reach us at: P.O. Box 64, Station P, Toronto, Ontario, M5S 2S6
Phone: 416-534-0100 • fax: 416-536-0100 • email: *info@peopleforeducation.com* or *visit: www.peopleforeducation.com*